# Sifooyinka mu'miniinta Quraanka ku sugan

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَهُمْ جَنَّاتٌ تَجْرِي مِن تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ ذَٰلِكَ الْفَوْزُ الْكَبِيرُ}،**

**(Kuwa xaqa rumeeyay Camal fiicana falay waxay mudan Jannooyin ay dureeri dhexdeeda Wabiyaal, taasina waa liibaan wayn)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Iimaanka wuxuu ka mid yahay nimcooyinka waaweyn Alle uu ku mannaystay aadanaha, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{بَلِ اللَّهُ يَمُنُّ عَلَيْكُمْ أَنْ هَدَاكُمْ لِلْإِيمَانِ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ}،**

**(Eebaa manna idinku leh inuu idinku hanuuniyay Iimaanka haddaad run sheegeysaan)**

Waana waddada lagu gaaro nolol aamin ah oo degan, iyo liibaanta iyo ajirka weyn, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِّن ذَكَرٍ أَوْ أُنثَىٰ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيَاةً طَيِّبَةً وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُم بِأَحْسَنِ مَا كَانُواْ يَعْمَلُونَ}**

**(Ciddii camal fasha wanaag oo Raga ama haweena isagoo mu’mina waxaan noolaynaynaa Nolol wanaagsan, waxaana ku abaal marinaynaa Ajirkooda waxa ugu Wanaagsan ee ay falayeen)** wuxuu leeyahay (caza wa jalla):

**{إِنَّ الَّذِينَ آمَنُواْ وَعَمِلُواْ الصَّالِحَاتِ وَأَقَامُواْ الصَّلاَةَ وَآتَوُاْ الزَّكَاةَ لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِندَ رَبِّهِمْ وَلاَ خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلاَ هُمْ يَحْزَنُونَ}**

**(kuwa rumeeyay xaqa, oo Camal fiican falay, oo Oogay Salaadda, oo Bixiyay sakada waxay ka mudan ajirkooda Eebahood agtiisa, wax cabsi ah iyo murugana korkooda ma ahaato)**

Qofka fiirfiiriya quraanka kariimka wuxuu ogaanayaa in Alle (SW) uu ku tilmaamay mu’miniinta sifooyin badan ku sugan kitaabkiisa qiimaha badan, waxaa ka mid ah: ilaalinta salaadaha waqtigooda, iyo dhammaystiridda arkaantooda iyo in lagu khushuuco wuxuu leeyahay Alle:

**{قَدْ أَفْلَحَ الْمُؤْمِنُونَ * الَّذِينَ هُمْ فِي صَلَاتِهِمْ خَاشِعُونَ}.**

**(Waxaa Dhab ahaan u Liibaanay Mu'miniinta * Ah kuwa Salaaddooda ku Khushuuca)**

Wuxuu leeyahay (SW:

**{وَالَّذِينَ هُمْ عَلَى صَلَوَاتِهِمْ يُحَافِظُونَ}**

**(waana kuwa Salaadadooda Ilaaliya)**

Waxaa ka mid ah in laga jeedsado laqwiga waa isku mid ha ahaado hadal ama fal, wuxuu leeyahay (SW):

**{وَالَّذِينَ هُمْ عَنِ اللَّغْوِ مُعْرِضُونَ}**

**(Oo ah kuwa Hadalka Macno Darro ka Jeedsada)**

Mu’miniinta way iska sarraysiiyaan arrimaha liita, waxay ku dadaalaan arrimaha sarreeya, wuxuu leeyahay (SW):

**{وَإِذَا سَمِعُوا اللَّغْوَ أَعْرَضُوا عَنْهُ}**

**(Markay Maqlaan hadal Macno Darrana way ka Jeedsadaan)**

Wuxuu leeyahay sidoo kale:

**{وَالَّذِينَ لا يَشْهَدُونَ الزُّورَ وَإِذَا مَرُّوا بِاللَّغْوِ مَرُّوا كِرَامًا}،**

**((Kuwa Fiican) waa kuwaan Furayn Been, Markay Maqlaan Hadal Xunna Mara iyagoo Wanaagsan (Ka Jeedsada).)**

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaate):

**(مِنْ حُسْنِ إِسْلَامِ الْمَرْءِ تَرْكُهُ مَا لَا يَعْنِيهِ)**

**(wanaagga islaamnimada qofka waxaa ka mid ah inuu ka tago wax aan qiime u lahayn)**

Waxaa ka mid ah: waxbixinta, iyo faridda wanaagga iyo reebidda xumaanta, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَالْمُؤْمِنونَ وَالْمُؤْمِناتُ بَعضُهُم أَوْلِياءُ بَعْضٍ يَأمُرونَ بِالمَعروفِ وَيَنهَونَ عَنِ الْمُنكَرِ وَيُقيمونَ الصَّلاةَ وَيُؤتونَ الزَّكاةَ وَيُطيعونَ اللَّـهَ وَرَسولَهُ أُولـئِكَ سَيَرحَمُهُمُ اللَّـهُ إِنَّ اللَّـهَ عَزيزٌ حَكيمٌ}.**

**(Mu'miniinta rag iyo Haweenba qaarkood qaarka (kale) waa u Sokeeye waxayna faraan wanaagga kana reebaan xumaanta, waxayna oogaan salaadda, waxayna bixiyaan Zakada, waxayna Addeecaan Eebe iyo Rasuulkiisa, kuwaas waxaa u naxariisan Eebe, illeen Eebe waa adkaade fal sane)**

Waxaa ka mid ah: inay yihiin dad dhowrasan oo xalaalmiirato ah, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَالَّذِينَ هُمْ لِفُرُوجِهِمْ حَافِظُونَ * إِلَّا عَلَى أَزْوَاجِهِمْ أَوْ مَا مَلَكَتْ أَيْمَانُهُمْ فَإِنَّهُمْ غَيْرُ مَلُومِينَ}**

**(Oo ah kuwa Furuujtooda Ilaaliya * Haweenkooda iyo waxay Hanatay Gacantoodu mooyee, lagurna Dagaalo Taas)**

Nabigeena naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee wuxuu ducadiisa ku weyddiin jiray rabbigiisa (caza wa jalla)

dhowrsanaan, wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ الهُدَى وَالتُّقَى والعَفَافَ وَالغِنَى)**

**(Ilaahayow waxaan ku weyddiinayaa hanuun iyo taqwo iyo dhowrasaan iyo hodannimo)**

Wuxuu leeyahay Muxammad bin Alxanafiya (Alle ha u naxariistee): dhammaystirnaanta seddex ayay ku sugan tahay dhowrsanaanta diinta iyo ku sabridda musiibooyinka iyo maamulka fiican ee xagga nololsha.

Waxaa ka mid ah: ilaalinta amaanada iyo oofinta ballanta, mu'minka dhabta ah mar kaste wuxuu ku dadaalaa amaanadiisa siduu ugu dadaalo beeralleyga beeritaankiisa, shaqaalahana farsamadiisa, iimaanka iyo oofinta ballanta way isku xiran yihiin, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَوْفُوا بِالْعُقُودِ}**

**(Kuwa (Xaqa) Rumeeyoow Oofiya Ballanka)**, wuxuu leeyahay Alle:

**{إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَى أَهْلِهَا}**

**(Eebe wuxuu idin Fari inaad u Gudaan (siisaan) Amaanada Ehelkeeda)**, wuxuu isku xiray nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) iimaanka iyo amaanada wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لَا إِيمَانَ لِمَنْ لَا أَمَانَةَ لَهُ، وَلَا دِينَ لِمَنْ لَا عَهْدَ لَهُ).**

**(Iimaan ma laha qofkaan amaano lahayn diinna ma laha qofkaan ballan lahayn)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan ugu sharafta badan khalqiga sayidkeena Muxammad iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Waxaa ka mid ah sifooyinka mu'miniinta: inay Alle (caza wa jalla) xuskiisa daa'imaan, si fiicanna way u talasaartaan (SW), wuxuu leeyahay Alle (SW):

{الَّذِينَ آمَنُوا وَتَطْمَئِنُّ قُلُوبُهُمْ بِذِكْرِ اللهِ أَلَا بِذِكْرِ اللهِ تَطْمَئِنُّ الْقُلُوبُ}

**(Ee ah kuwa rumeeyay Xaqa kuna xasishay Quluubtoodu xuska Eebe, xuska Eebayna ku xasishaa Quluubtu)**

Wuxuu leeyahay (SW):

{إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ}

**(Mu'miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Alle la xuso ay cabsato quluubtoodu, marka lagu akhriyo korkooda aayaadka Allena ay iimaan u kordhiso, Allahoodana uun tala saarta)**

Talasaarashada dhabta ah waa sida dhabta uu addoonka u cuskado Alle waxayna ku xiran tahay inuu la yimaado camal iyo dadaal, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(لَوْ أَنَّكُمْ تَتَوَكَّلُونَ عَلَى اللهِ حَقَّ تَوَكُّلِهِ لَرَزَقَكُمْ كَمَا يَرْزُقُ الطَّيْرَ، تَغْدُو خِمَاصاً وَتَرُوحُ بِطَانًا)

**(Haddaad u talasaaran lahaydeen Alle si dhab ah wuxuu idin arsaaqi lahaa siduu u arsaaqo shinbirta, waxay kalahaysaa iyadoo gaajaysan waxayna noqonaysaa iyadoo dhergan)**

Iimaanka dhabta ah raadkiisa bulshada ayuu soo gaaraa mu'minka dhabta ah ma noqdo khiyaanoole iyo munaafuq iyo

beenlow iyo mid ballanta khiyaana iyo mid ballanta buriya, iimaanka dhabta ah wuxuu hagaajiyaa nafta, mu'minka dhabta ah waa qof xishood badan oo deeqsi ah dadka jecel lana jecel yahay, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{ثُمَّ كَانَ مِنَ الَّذِينَ آمَنُوا وَتَوَاصَوْا بِالصَّبْرِ وَتَوَاصَوْا بِالْمَرْحَمَةِ}**

**(Markaas ka mid noqdo kuwa Rumeeyay xaqa, isuna dardaarma Samirka, isuna dardaarma naxariista)**

Wuxuu leyahay Alle (SW):

**{وَالْعَصْرِ * إِنَّ الْإِنسَانَ لَفِي خُسْرٍ * إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَتَوَاصَوْا بِالْحَقِّ وَتَوَاصَوْا بِالصَّبْرِ}،**

**(Waxaan ku dhaartay waqtiga casarka ah * In Dadku khasaaro ku sugun yahay * Marka laga reebo kuwa rumeeyay xaqa ee Camal fiican fala, isuna dardaarma xaqa, isuna dardaarma Samirka)**

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

**(مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللهِ وَاليَوْمِ الآخِرِ فَلَا يُؤْذِ جَارَهُ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ باللهِ وَاليَوْمِ الآخِرِ فَلْيُكْرِمْ ضَيْفَهُ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ باللهِ وَاليَوْمِ الآخِرِ فَلْيَقُلْ خَيْرًا أَوْ لِيَصْمُتْ).**

**(Qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro yuuna dhibin deriskiisa , qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakkhiro martidiisa ha karaameeyo, qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro wanaag ha sheego ama ha iska ammuso)**

Maxaa ka fiican inaan qabsano farriimaha iimaanka ilaa aan amaan ka helno iyo xasillooni iyo deganaan iyo liibaanta adduunka iyo aakhiro, wuxuu leeyahay Alle asoo ka hadlaya abaalka mu'miniinta:

**{أُولَـئِكَ هُمُ الْوَارِثُونَ*الَّذِينَ يَرِثُونَ الْفِرْدَوْسَ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ}،**

**(Kuwaasu waa kuwa Dhaxli * oo ah kuwa Dhaxli Firdowsa wayna ku Dhex waari)**

Wuxuu leeyahay (SW):

**{إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَلَهُمْ أَجْرٌ غَيْرُ مَمْنُونٍ}**

**(Hase yeeshee kuwa rumeeyay xaqa camal wanaagsanna falay, waxay mudan Ajri aan go'aynin)** wuxuu leeyahay:

**{إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ كَانَتْ لَهُمْ جَنَّاتُ الْفِرْدَوْسِ نُزُلًا * خَالِدِينَ فِيهَا لَا يَبْغُونَ عَنْهَا حِوَلًا}.**

**(kuwa rumeeyay (xaqa) oo fala camal fiican waxay u ahaatay jannada firdowso degid, (martiqaad) * wayna ku waari dhexdeeda mana doonaan inay xaggeeda ka wareegaan (guuraan))**

**Ilaahayow iimaanka na jecelaysii kuna qurxi quluubteena**